

Sida aad u heli karto Talaalka COVID-19

Qof Kasta oo da'diisu tahay 60 sano ama ka wayn Wuxuu xaq u leeyahay in lasiiyo cirbada talaalka Magaceedu yahay AstraZeneca

Hadii aad rabto inaad ogaato meesha aad ka heli karto talaalka ama aad qabto su'aal waxaad wacdaa Khadka tooska ah ee Victoria Coronavirus **1800 675 398**.

Hadii aad u baahantahay tarjumaan wac telefanka nambarkiisu yahay **131 450** si ay kuugu xiraan khadka tooska ah ee Victoria Coronavirus



Image: Courtesy of Australian Government Department of Health

Ballan Samayso

Qof kasta oo kaweyn 60 sano balan ayuu samaysankaraa si uu u helo ama u qaato talaalka, balanta waxaad kasamaysan kartaa meelaha hoos ku xusan ama ku qoran:

Dhaqtarkaada (GP)	Rukta Caafimaadka Bulshada	Rukta Talaalka
<ul style="list-style-type: none">Wac ama internetka ka samayso ballanta.	<ul style="list-style-type: none">Wac am internetka ka samayso ballanta.	<ul style="list-style-type: none">Waxaa fiican inaad ballan samaysatoMeelaha talaalka laga bixiyo waxaa laga yaabaa inaad sugto wakhti dheer hadii aadan ballan samaysan. Riix xaga hoose si aad u ogaato goobaha talaalka.www.coronavirus.vic.gov.au/vaccination-centresHadii da'daadu tahay inta u dhaxaysa 40 ilaa 59 sano waxaa qaadan kartaa nooca talaalka magiciisu yahay Pfizer inaad ballan samaysatana muhiim maaha
<ul style="list-style-type: none">Sitoos ah ula xiriir dhaqtarkaada (GP) laakin GPs oo dhan kama heli kartid talaalka	<ul style="list-style-type: none">Sitoos ah ula xiriir rukta caafimaadka bulshada ee kuu dhaw.	<ul style="list-style-type: none">Ballan Samayso adoo wacaya nambarkaan. 1800 675 398Hadii aad turjubaan ubaahantahay wac nambarkaan. 131 450

Hadii aad walaac ka qabto caafimaad daro horay ujirtay ama daawo aad qaadanayso, waxaa lagu taliyay ama fiican inaad kala tashato dhakhtarkaaga intaadan qaadan talaalka. Sidoo kale dhakhtarkaagu wuxuu kuu daabici karaa akhbaarta caafimaadkaaga ku saabsan si aad uqaadato markaad tagaysid ballanta Talaalka, sidoo kale dhaqtarkaagu wuxuu kaala hadli karaa wixii ku saabsan caafimaadkaaga.

Maxaan soo qaataa markaa tagayo ballanta talaalka?

- Aqoonsi sawirkaagu ku dhaganyahay hadii aad haysatid.
- Kaarka caafimaadka (medicare) Hadii aad haysatid.
- Kaarka shaqadaada hadii COVID-19 Talaalka qaadashadiisu la xiriito shaqadaa.
- Akhbaar ka socoto dhaqtarkaada oo ku saabsan caafimaadkaada iyo daawooyinka aad qaadnaysid.
- Akhbaar ku saabsan talaalkii (COVID19) oo aad qaadatay iyo nooca aad qaadatay iyo taariikhda aad qaadatay.
- Akhbaar ku saabsan dhibaato kaaga timid talaal aad horay u qaadatay.
- Magaca dhaqtarkaaga iyo dhaqatar takhasusle ah oo aad leedahay.
- Maaska wajiga lagu xirto hadii loo baahan yahay in la xirto gobolka aad dagantahay.
- Xaqiiji in kaarkaada caafimadku yahay mid aanan dhicin
 - waxaad samayn kartaa adigoo;
 - Galo khadka tooska ee kaarka caafimadka (Medicare online) myGov at www.my.gov.au
 - ama aabka kaarka caafimaadka (The Express Plus Medicare app).
 - ama adoo wacayo xafiiska ama waaxda kaarka caafimaadka ee 132 011
 - Ama tag xafiiska kaarka caafimaadka ee ku jaal dagaankaada.
 - Hadii aadan ku lahayn akawn caafimad oo aad ka ogaan karto kaarka caafimaadka waxaad ka sameysankartaa:
 - Adigoo iska qora waxaada kaarka caafimaadka hadii aadan diiwaangashanayn.
 - Ka samayso kaarka caafimaadka khadka internadka ah, hadii aadan horay uga samaysan kidibna la xiriiri, (link to myGov).

Talaal waad qaadankartaa hadii aadan haysan kaarka caafimaadka

Hadii aad qaadatay talaal xili dhaw sida talaalka hargabka ama durayga waa inaad sugtaa 7 maalmood ugu yaraan intaadan qaadatay talaalka COVID19.